
# Baarlamaanka Soomaaliya hasoo saaro dastuur ka yimid una adeega shacabka




The Heritage Institute For Policy Studies

Febaraayo 2017

Waxaa faafiyay Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2017, Muqdisho, Soomaaliya

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.

Bogga hore: cilmibaare aqrinaya dastuurka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya

Xuquuqda © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo https://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/

Kala soo bax qoraalka bogga www.heritageinstitute.org

# Tusmo


Nuxurka Qoraalka ..... 1

Hordhac ..... 2

Raad-raac ..... 2

Geeddi-socodka Dastuur Samaynta: Marxaladdii Kumeelgaarka ..... 3

Geeddi Socodka Dastuur-Sameynta: Kumeelgaarkii Kaddib ..... 5

Nuxurka Dastuurka: Arrimaha La isku Hayo ..... 7

Hirgelinta Federaalka: Hoggaamiyeyaasha Heer Gobol ..... 7

Somaliland (Kon-federaal ama Federaal aan Awoodaha Loo Sinneyn) ..... 8

Puntland: Maqaam Gaar ah ..... 9

Maamullada Kumeelgaarka ah ..... 9

Qaybsiga Awoodaha, Khayraadka iyo Masuuliyadaha ..... 9

Nidaam Madaxweyne mise Mid Baarlamaani ah ..... 11

Naqshadda Labada Aqal ee Baarlamaanka ..... 14

Maqaamka Muqdisho ..... 16

Gunaanad ..... 18

Talooyin Tixgelin Mudan ..... 18

# Nuxurka Qoraalka

Siyaasadda dastuur-sameynta Soomaaliya waxay ahayd mid qasan, la isku heysto, shacabkana aan laga qayb gelin tan iyo intii howsha dastuur samayntu ay bilaabatay bilowgii sanadkii 2000, markaas oo ay gacanta ku hayeen dowladihii kumeelgaarka ahaa. Dowladdii la dhisay sanadkii 2012-ka, markii uu dhamaaday kumeelgaarnimadii, waxa ay ballan qaadday in ay dalka gaarsiin doonto doorasho dimuqraaddi ah, in ay awoodda daadajin doonto, dastuurkana dhamaystiri doonto islamarkaana afti dadweyne ayqaadi doonto kahor dhammaadka muddo-xileedkeeda. Balse, ballan-qaadyadaas oo dhan wali lama fulin. Inkasta oo Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka la aasaasay sanadkii 2012-ka, haddana Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa la sameeyay labo sano kadib xilligii la qorsheeyay. Labada guddi ma ayan helin dhaqaalihii ay u baahnaayeen si ay u dhammaystiraan dib-u-eegista dastuurka. Guddiyadan waxa ay lixdii bilood ee ugu danbeysay si dadaal wadata uga shaqeeyeen dastuurka kahor dhammaadka muddo xileedka dowladda. Labada guddi si kala madax bannaan ayay u sameeyeen dib-u-eegista dastuurka.

Muddadii afarta sano ahayd ee dowladdii la doortay 2012 waa ay dhamaatay, bulshada Soomaalida inteeda badanna war kama hayaan ama lagalama tashan guud ahaan dastuurka dalka iyo gaar ahaan howsha labada guddi. Sidaas si lamid ah, marka laga reebo madaxweynayaasha gobollada iyo kan dowladda federaalka, ra'iisul wasaaraha iyo guddoonka baarlamaanka, daneeyayaasha siyaasadda dalka oo ay kamid yihiin baarlamaankii 9-aad ma helin fursad ay ku miisaamaan talooyinka dastuureed ee ay soo bandhigeen Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka.

Arrintaasina waxa ay keentay in su'aalihii muhiimka ahaa ee dastuurka ee la xiriiray ama taabanayay jinsiyadda, kala qeybinta awoodaha iyo masuuliyadaha u dhexeeya dowladda dhexe iyo maamullada gobollada, maqaamka Muqdisho, iyo hannaanka garsoorka in aan weli la xalliyin. Maaddaama wakhtigu uu ku yaraa, aragtiyadana ay ku kala duwanaayeen, Madasha Hoggaamiyayaasha Qaran (MHQ) waxa ay go'aansadeen in arrimaha lagu kala aragtida duwan yahay dib loogu dhigo baarlamaanka 10-aad iyo dowladda xigta midda markaas waqtigeedu sii dhammaanayey.

Maaddaama baarlamaankii 10-aad la dhisay, hannaanka dib-u-eegista dastuurka waa in si dhab ah loogu daadajiyaa muwaadiniinta oo aqbalaaddooda iyo ka qeyb galkoodu ay lagama maarmaan u yihiin sharciyeynta dastuurka. Dadaalka iyo natiijada Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo midka Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka waa in aanay koox yar isku koobin sida Madasha Hoggaanka Qaran. Baarlamaanka cusub waa in uu xalliyaa arrimahan isaga oo la tashanaya bulshada rayidka iyo shacabka. Baarlamaankii 9-aad waxa ay kaalintiisu ahayd in uu u gudbiyo dib u eegista dastuurka iyo ansixintiisaba baarlamaanka iyo dowladda xigta. Iyagana waa in ay ku dadaalaan in ay ka dhigaan hannaanka mid shacabku uu talo ku leeyahay.

Muddo 25 sano ah kaddib, hoggaanka siyaasadda Soomaaliya waxa uu ku guul darreystay in dastuurka dalku uu noqdo mid ka yimid una shaqeeya shacabka. Natiijada ka dhalatay guul-darradaasi waxa ay ahayd mid burbur noocyo badan ah keentay. Horumarinta nabadda iyo dowlad dhisidda Soomaaliya waxa ay noqotay mid aan caddeyn. Waa in khibrad laga kororsado wixii lasoo maray. Shacabka Soomaaliyeed waa in ay hannaanka dib u eegista dastuurka kaalin ku yeeshaan. Bulshada rayidka waa in ay iyaga qudhoodu muujiyaan in aragtida shacabku ay aasaas u tahay dastuurka.Waa in uu dhamaadaa waqtigii loola dhaqmayay muwaadiniinta Soomaaliyeed sidii marti inay dalkooda ka yihiin. Dastuurka waa ka weyn yahay in koox yar kaliya lagu aamino.

## Hordhac

Dastuurradu waxa ay nidaamiyaan danaha siyaasadeed, kuwa bulsho iyo kuwa dhaqaale ee muwaadiniinta iyo hay'adaha dowladda. Sannadkii 2012 is-jiid-jiid badan kaddib, hoggaanka dowladda federaalka iyo maamullada gobollada waxa ay ku heshiiyeen dastuur aan dhameystirneyn. Sikastaba xaalku ha noqdee, dowladdii la dhisay kumeelgaarkii kaddib waxa ay ku guuldarreysatay in ay dhameystirto hannaanka dastuur sameynta Soomaaliya. Dhammaadkii 2016, xildhibaanno xusub ayaa la doortay lana caleema saaray.

Maaddaama baarlamaanka 10-aad uu howshiisa bilaabay horraanta 2017 islamarkaana madaxweyne u doortay Maxamed Cabdullahi 'Farmaajo', Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waxa uu rajeynayaa xildhibaannada cusub, siyaasiyiinta heer federaal iyo heer gobol iyo bulshada rayidka ah in ay ahmiyad siin doonaan dhamaystirka dastuurka. Machadka waxa uu soo bandhigayaa qormadii ugu horreysay warbixinno taxane ah ee faaqidi doona su'aalo dastuuri ah. Warbixintan waxa ay sharraxaad iyo qiimaynba ka bixinaysaa taariikhda iyo hannaanka uu soo maray dastuur-sameynta Soomaaliya. Waxa ay sidoo kale faaqideysaa qaar kamid ah arrimaha loollanka badan ka jiro ee la xiriira nuxurka iyo hannaanka dastuur-sameynta. Waxa ay warbixinta si gaar ah u faaqidi doontaa afar arrimood: hannaanka federaalka, xiriirka u dhexeeya hay'adaha fulinta, labada aqal ee baarlamaanka, iyo maqaamka caasimadda Muqdisho. Warbixinta waxa ay kusoo gunaanadi doontaa talooyin ku socda inta ay taladu ka go'do oo baarlamaanku ugu horreeyo iyo guud ahaan dadka Soomaaliiyeed.

## Raad-raac

Dowladnimada Soomaaliya waxa ay dhalatay 1960-kii markii ay midoobeen dhulkii Soomaaliyeed ee Ingiriisku gumaysanayey ee woqooyiga loona yaqaanney British Somaliland iyo dhulkii Talyaanigu xukumayey ee koofurta loona yaqaannay Italian Somaliland. Tan iyo 1960-kii, Soomaaliya waxa ay yeelatay saddex dastuur (1960, 1979 iyo 1990), labo axdi (2000 iyo 2004), iyo hal dastuur oo kumeelgaar ah (2012). Inkasta oo dastuurkii 1960-kii uu ahaa mid ay diyaarisay xukuumaddii daakhiliga (1950-1960), dowladdii cusbeyd ee Soomaaliya (1960-kii) si ku meelgaar ah ayay u aqbashay dastuurkaas.[1] Sanadkii 1961-dii, dowladda waxa ay soo bandhigtay dastuurkii, shacabka ayaana afti dadweyne ku ansixiyey[2]. Waxaa dastuurkan la laalay 1969-kii kaddib markii awooddii dalka ay afgambi kula wareegeen taliskii militariga ahaa ee uu hoggaaminayay Maxamed Siyaad Barre.[3] Sannadkii 1979, dowladdii militariga ayaa soo bandhigtay dastuur kale oo isla sanadkaasi afti dadweyne oo macmal ah lagu ansixiyay. Jabhado hubaysan oo mucaarad ah ayaa xukuumaddii ka horyimid, kuwaas oo u istaagay in uu dhamaado xukunkii kaligii taliska ahaa, islamarkaana dalbaday dimuqraadiyad dhab ah. Hoggaanka militariga oo arrinkan ka jawaabayay ayaa diyaariyey dastuur cusub 1990-kii.[4] Kahor intii aan afti loo qaadin dastuurkaas, ayaa dowladdii burburtay sanadkii 1991 taasi oo gogol xaar u noqotay 10 sano oo ay hoggaamiyo kooxeedyo dalka ku amar ku taaglaynayeen.

---

[1] *Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya*, la qaatay 1960,http://www.ilo.org/dyn/travail/docs/2176/Constitution1960.pdf

[2] *Tirada rasmiga ah ee Aftdii 1961dii loo qaaday Dastuurkii 1960kii ee Jamhuuriyadda Soomaaliya*, 20 June 1961, http://www.somalilandlaw.com/The_1961_Referendum_Table_1.pdf

[3] Ismail I Ahmed iyo Reginald Herbold Green, The heritage of war and state collapse in Somalia and Somaliland: local-level effects, external interventions and reconstruction, *Third World Quarterly*, 20(1) (1999):http://cja.org/cja/downloads/Heritage_of_war___state_collapse.pdf

[4] *Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya*, la qaatay 1990, http://aceproject.org/ero-en/regions/africa/SO/somalia-constitution-1990/view

## Geeddi-socodka Dastuur Samaynta: Marxaladdii Kumeelgaarka

Kaddib dhowr shir oo dib u heshiisiineed oo aan mira dhal noqon sanadihii 1990-kii, shirkii dib u heshiisiinta ee ka dhacay Carta, Djibouti waxa uu soo saaray Axdiga Qaran ee Kumeelgaarka ah. Axdigaas waxa uu soo jeediyay hannaan awoodda la daadajinayo, iyada oo loo marayo is-maamul iyo xukun hoosaad gobollada la siinayo. Heshiiskii Carta waxa uu awoodaha si siman ugu qeybiyay afar beelood oo waaweyn, iyada oo beelaha laga tirada badan yahay la siiyey bar. Sikastaba ha ahaatee, dowladdii qaran ee kumeelgaarka ahayd ee ka dhalatay hannaankan waxa ay ku guuldarreysatay in ay dalka ka shaqeyso.

Kahor inta aanu muddada Axdiga Qaran ee Kumeelgaarka ah dhammaan, urur goboleedka IGAD ayaa maalgeliyey shir dib u heshiisiineed oo kale oo lagu qabtay magaalooyinka Eldoret iyo Mbegathi ee Kenya sannadkii 2002. Intii uu shirkaasi socday, guddi ayaa loo xilsaaray in ay soo diyaariyaan axdi kumeelgaar ah oo cusub. Guddiga ayaa u kala jabay labo garab. Guddi saddexaad oo afkaartooda isku soo aruuriya oo ka koobnaa 13 khubaro Soomaaliyeed ayaa la sameeyay si ay isku waafajiyaan labada dastuur ee guddiga labada u kala jabay ay soo kala qoreen. Sikastaba ha ahaatee, talooyinkii guddiga iswaafajinta laguma darin axdiga la ansixiyey. Qaban-qaabiyayaasha shirkaas (IGAD, Itoobiya iyo Kenya) ayaa ku guuleystey in la ansixiyo axdi ay iyagu wateen.[5]

Axdiga Federaalka Kumeelgaarka (2004) waxa uu farayey in la sameeyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dastuurka Federaalka oo ay howshiisa noqoneyso in uu dastuur federal ah ku qoro labo sano iyo bar.[6] Guddiga oo ka koobnaa 15 xubnood, waxa la sameeyay bishii June 2006 kaddib wareegto uu madaxweynuha soo saaray, baarlamaankuna ansixiyey.[7]

Sanadkii 2008-da, Dowladda Federaalka Kumeelgaarka iyo Isbaheysiga Dib-u -xoraynta ayaa ku heshiiyay in ay awoodda wadaagaan. Waxa ka dhashay heshiiskan in madaxweyne Cabdullaahi Yuusuf uu xilka iska casilo bishii Disembar 2008-da, waxaana beddelay Shariif Sheekh Axmed bishii Janaayo 2009. Dowladda cusub waxa ay 15 xubnood ku dartay Guddiga Madaxa Bannaan ee Dastuurka Federaalka bishii Janaayo 2010, taasi oo guddiga ka dhigtay 30 xubnood.

Guddiga waxa uu soo saaray Qabyo Qoraalkii ugu horreeyay bishii Juulaay ee 2010-ka si talo dadweyne loo geliyo. Arrimaha federaalka, jinsiyadda, iyo qaab dhismeedka dowladda ayaa ahaa qaar kamid ah arrimaha aadka loogu kala aragtida duwanaa ee qabyo qoraalka dastuurka lagusoo bandhigay. Sannadkii 2011-kii, guddi cusub oo khubaro ah ayaa la sameeyay si ay u caawiyaan, dastuurkana ula dhameystiraan, guddiga madaxa bannaan ee dastuurka. Maxamed Sheekh Cismaan 'Jawaari', oo noqday afhayeenkii baarlamaankii 9-aad ee federaalka, ayaa guddoomiye u ahaa guddiga khubarada ah oo sagaalka xubnood ka koobnaa.[8] 11-kii Janaayo 2017, ayaa mar labaad Jawaari loo doortay in uu noqdo afhayeenka baarlamaanka tobnaad.[9]

Barnaamijka Horumarinta Qaramada Midoobay (UNDP) iyo Xafiiska Siyaasadda Soomaaliya ee Qaramada Midoobay (UNPOS) waxa ay kaalin muhiim ah ku lahaayeen hannaanka dastuur

[5]Antonios Kouroutakis, The Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia: Process, Architecture, and Perspectives,*Cambridge Journal of International and Comparative Law*, (2014)

[6]ILO, *The Transitional Federal Charter of the Somali Republic*, Nairobi, February 2004

http://www.ilo.org/dyn/travail/docs/2177/Transitional%20Federal%20charter-feb%202004-English.pdf

[7] Somali Talk Radio, *Progress Report of the Independent Federal Constitution Commission*, May 2010, http://somalitalkradio.com/2010/may/draft1_dastuur.pdf

[8] Afyare Cilmi, *Revisiting the UN-Controlled Constitution-Making Process for Somalia*, Sep 2 2012,http://www.e-ir.info/2012/09/02/revisiting-the-un-controlled-constitution-making-process-for-somalia/

[9]VOA, "Somali Lawmakers Re-elect Parliament Speaker, 11 January 2017, http://www.voanews.com/a/somalia-lawmakers-re-elect-speaker-of-parliament/3672019.html

sameynta Soomaaliya. Waxa ay taageero maaliyadeed iyo mid farsamo siiyeen labada guddi; waxa ay qaban qaabiyeen in xubnaha labada guddi ay booqdaan dalalka colaadaha kasoo kabanaya si ay khibrado uga kororsadaan waxa ayna Nairobi ku qaban qaabiyeen kalfadhiyo shaqo oo ay guddiyadaasi yeesheen.

Siyaasiyiinta Soomaalida iyo beesha caalamka ayaa ku kulmay magaalada Garoowe laba jeer bilihii Diseembar 2011-kii iyo Febraayo 2012-ka.[10] Shirkii koowaad ee Garoowe ee loo yaqaanno Garoowe I, siyaasiyiinta heer qaran iyo heer gobol waxa ay ku heshiiyeen in la sameeyo golaha qaran ee metela shacabka oo iyagu si kumeelgaar ah u ansixiya dastuurka iyo sidoo kale sameynta aqalka sare ee baarlamaanka.[11] Sikastaba ha noqotee, shirkii Garoowe II ee Febraayo 2012-kii ayaa ahaa mid lagu gaaray go'aanno siyaasadeed oo saameynayey nuxurka dastuurka, kuwaas oo ay kamid ahayd in la qaato habka baarlamaaniga ah.[12]

Labadii guddi ee dastuurka waxa ay qabyo qoraal iswaafajinaya aragtiyada kala duwan,usoo bandhigeen bishii Abriil 2012-kii lixda saxiixayaal ee hannaanka Roadmap-ka iyo Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey Danjire Augustine Mahiga. Lixda saxiixayaal waxa ay kala ahaayeen Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed, guddoomiyaha baarlamaanka Shariif Xasan Sheekh Aaden, iyo Ra'iisul Wasaare Cabdiweli Maxamed Cali oo Dowladda Federaalka Kumeelgaarka metelayay, Madaxweyne Cabdiraxman Maxamed 'Faroole' oo matalayey Puntland, Madaxweyne Axmed Caalin oo Galmudug ah, iyo Cabduqaadir Macalin Nuur oo metelayay ururka Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ).

Saxiixayaashu waxa ay kulan dastuurka looga hadli lahaa oo Muqdisho lagu muddaysnaa u beddeleen in uu ka dhaco Addis Ababa, iyaga oo aanan ku casuumin xubnaha labada guddi ee dastuurka. Guddi farsamo oo dib u eegis oo aan xubnihiisa la shaacin[13], ayaa la sameeyay waxa uuna dib u eegis ku sameeyay dastuurka, saxiixayaashuna waxa ay ku dhawaaqeen in ay ka heshiiyeen arrimihii la isku maan-dhaafsanaa ee dastuurka. Guddiga farsamo ayaa kulan laba isbuuc uga socday Nairobi mar labaad dib-u-eegis ku sameeyay qaar kamid ah qodobada dastuurka kahor inta aanan qoraalka ugu danbeeyay loo gudbinin saxiixayaasha.

Bishii Juun 2012, saxiixayaasha ayaa Nairobi ku ansixiyay Dastuurka Kumeelgaarka ah iyo afar habraac oo kala ah: habraaca lagu sameynayo Golaha Metelaadda Qaran, habraac lagu sameynayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, habraac lagu sameynayo Guddiga Farsamo ee Sooxulista iyo habraaca lagu sameynayo Guddiga Fududeynta Farsamo ee Saxiixayaasha.[14] Heshiiskan waxa ka horreeyay wareegto kasoo baxday Dowladda Federaalka Kumeelgaarka ah ee lagu kala diray Guddigii Madaxa Bannaanaa ee Dastuurka iyo Guddigii Khubarada.[15]

[10] Shirarka dastuurka ee lagu kala qabtay Garowe I iyo II iyo Gaalkacyo waxa ay ahaayeen shirar tixane ah oo ay Qaramada Midoobay fududeyneysay waxa uu ujeedkoodu ahaa dhameystirka iyo ansixinta dastuurka sanadka 2012.

[11] Shirkii wadatashiga Qaran ee Dastuurka ee ugu horreeyay waxa lagu qabtay Garowe intii u dhexeysay 21 iyo 23 December 2011, http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=HGL2Wx5OstE%3D&tabid=9705&language=en-US

[12] Shirkii wadatashiga Qaran ee Dastuurka ee labaad waxa lagu qabtay Garowe intii u dhexeysay 15 and 17 February 2012, http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=RhnQqHTAfCA%3D&tabid=9705&mid=12667&language=en-US

[13] Sida aan ku ogaannay wareysiyo aan la yeelannay siyaasiyiin aad ugu dhawaa saxiixayaasha, guddigan uu ka koobnaa min saddex xubin oo ka socotay saxiixayaasha Roadmap-ka.

[14] Afyare Elmi, *Revisiting the UN-Controlled Constitution-Making Process for Somalia*, Sep 2 2012,http://www.e-ir.info/2012/09/02/revisiting-the-un-controlled-constitution-making-process-for-somalia/

[15] Jamhuuriyadda Soomaaliya Xafiiska Madaxweynaha, *Somali Transitional Government Decree Providing for the Transition to a new Federal Government For the Somali Republic*, June 23, 2012, http://unpos.unmissions.org/LinkClick.aspx?fileticket=eMt6HEc_gaA%3d&tabid=9705&language=en-US

Guddiga Farsamo ee Fududeynta ayaa u gudbiyay nuqul daabacan ee Dastuurka Kumeelgaarka ah Golaha Metelaadda Qaran bishii Juulaay 2012. Golaha oo ka koobnaa 825 ergo waxa la faray in ay u codeeyaan dastuurka iyaga oo aan waxba ka beddelin. 1-dii Agoosto 2012, Golaha Metelaadda Qaran ayaa ansixiyay Dastuurka Kumeelgaarka ah.[16]

## Geeddi Socodka Dastuur-Sameynta: Kumeelgaarkii Kaddib

Dastuurka Kumeelgaarka ah arrimo badan ayuu qabyo uga tagay. Is-afgaradkii la baxay Heshiiska Cusub (New Deal) [17] ee u dhexeeyay Soomaaliya iyo bulshada caalamka iyo Hiigsiga 2016[18] ee dowladda cusub ay degsatay waxa ay qorsheeyeen in la dhamaystiro dastuurka kahor dhammaadka muddada afarta sano ah oo ay dowladda iyo baarlamaanka cusub haystaan. Howsha dhamaystirka dastuurka waxa si gaar ah loogu xilsaaray guddiga Lasocodka ee Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka. Waxa intaa sii dheeraa in Wasaaradda Dastuurka, Maamullada Xubnaha ka ah Federaalka, hoggaanka shacabka iyo xubnaha bulshada rayidka ahba la sheegay in ay door muhiim ah ka qaataan dib-u-eegista dastuurka.

Inkasta oo dastuurka kumeelgaarka ah iyo Hiigsiga 2016 ay ku taliyeen in la sameeyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka bilowga howlgalka dowladda cusub, guddigan waxaa la sameeyay bishii Juun 2014, kow iyo labaatan bilood kaddib markii madaxweyne loo doortay Xasan Sheekh. Sida ku xusan Hiigsiga 2016, labada guddi ee dastuurka waxa ay masuul ka yihiin dib-u-eegista dastuurka.[19]

Bilowgii 2015, gole xukuumad cusub ayaa la dhisay; isla bishii Maajo 2015 Wasaaradda Arrimaha Dastuurka waxa ay heshiis isfaham ah la saxiixatay Guddiga Lasocodka Baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka heshiiskaas oo caddeynaya qeybinta shaqada, waajibaadka, iyo iskaashiga saddexda hay'adood. Is-afgaradka waxa uu saddexda hay'adood awoodo isla eg u siinayey hannaanka dib u eegista dastuurka.[20]

Si kastaba ha ahaatee, waxaa is casishay bishii May 2015 Caasha Geelle, guddoomiyaha Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, kow iyo toban bilood kaddib markii uu guddigu hawl bilaabay. Waxa ay ku sheegtay is-casilaaddeeda in ay ku saleysan tahay maalgelin la'aan, faragelin joogto ah oo howsha guddiga lagu hayo, xubnaha guddiga oo aan niyad fiican u hayn howsha, iyo in aan la gaari karin natiijooyin wax ku ool ah muddada uu guddiga heysto.[21] Maxamed Daahir Afrax ayaa beddelay Caasha Geelle isla sanadkaas. Sida uu farayo Dastuurka Kumeelgaarka ah [22], Guddiga Lasocodka oo ay guddoomiye ka tahay Xildhibaan Maryan Cariif Qaasim ayaa masuul ka ah jiheynta iyo ansixinta howsha Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib u eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

[16] Global Legal Monitor, *Somalia: New Constitution Approved*, August 2012, http://www.loc.gov/law/foreign-news/article/somalia-new-constitution-approved/
[17] Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, *The Somali Compact*, Sep 16, 2013http://eeas.europa.eu/delegations/somalia/documents/press_corner/20130916_the_somali_compact.pdf
[18] Villa Somalia, Vision2016: Principles and Recommendations, September 2-6, 2013 http://www.villasomalia.gov.so/wp-content/uploads/2014/11/VISION2016-_Final_COMMUNIQUE1.pdf
[19] *Ibid.*
[20] Is-afgaradka lama baahinin. Balse, UNDP ayaa kasoo qaadatay masuuliyadaha iyo kaalimaha Wasaaradda Arrimaha Federaalka, Guddiga Madaxa Bannaan iyo Guddiga Lasocodka Baarlamaanka isafgaradka oo la saxiixay 8-dii March 2015 dukumintiga UNDP ee Project Initiation Plan, 16 June 2015, https://info.undp.org/docs/pdc/Documents/SOM/PSG%201-2%20-%20Constitutional%20Review%20Project%20Initiation%20(Final%20for%20Signature%20Rev%202).pdf
[21] Horseed Media,*Somalia's Constitutional Reform Commission Chairperson resigns over 'Interference'*, May 6, 2015, https://horseedmedia.net/2015/05/06/somalias-constitutional-reform-commission-chairperson-resigns-over-interference/
[22] Qodobka 133 ee dastuurka

27-kii Juulaay 2015, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa ansixiyay qaraar jiheynaya hannaanka dib u eegista dastuurka. Qaraarka waxa uu u qeybiyay dib u eegista ilaa afar qeybood: arrimo lagu tilmaamay kuwo farsamo, arrimo siyaasadeed oo aad muhiim u ah, arrimo dol-daloolo ama gaabis ah oo loo baahan yahay in la buuxiyo iyo arrimo aad loogu kala aragti duwan yahay oo u baahan in si dhab ah wadahadal siyaasadeed iyo wadaxaajood looga yeesho. Qaraarka waxa uu u xilsaaray Guddiga Madaxa Bannaan ee Dastuurka iyo guddiga Baarlamaankuba in ay ka shaqeeyaan arrimaha farsamo ee Dastuurka Kumeelgaarka ah.[23]

Xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran (MHQ) ayaa sheegtay in siddeed arrimood oo ay kamid yihiin awood qeysiga, qaab-dhismeedka dowladda, awoodda labada aqal ee baarlamaanka, maqaamka caasimadda Muqdisho, iyo hannaanka garsoorka in ay yihiin arrimo muhiim ah oo kahor dhammaadka muddo-xileedka dowladda xubnaha madashu ay wada xaajood ka geli doonaan. 12-kii Abriil 2016, war-murtiyeed kasoo baxay Madasha Hoggaanka Qaran ayaa soo jeediyay in Garoowe lagu qabto shir dastuurka looga hadlayo [24] inta u dhexeysa bilaha May iyo Juun 2016. Masuuliyiinta ku kulmaya Garoowe waxa la filayey in ay diiradda saaraan siddeed arrimood oo la isku khilaafsanaa ee uu qaraarka baarlamaanku u dib dhigay wadaxaajoodka iyo heshiiska hoggaamiyayaasha siyaasadda. Balse, shirkii lama qaban sababo la xiriira khilaaf ka taagnaa qaab-dhismeedka dowladda awgood. Sida ay muujinayaan wareysiyo aan cilmibaaristan ku sameynay, dhawr xubnood oo katirsan Madasha Hoggaanka Qaran ayaa u arkey soo jeedinta ah in loo guuro hannaan dalku yeelanayo madaxweyne iyo kuxigeenno in ay tahay mid sii wiiqaysa qabaa'illada qaar, halka kuwo kalana awoodo dheeraad ah ay helayaan. Natiijo ka dhalatay khilaafkan dartiis, madasha waxa ay go'aansatay in dowladda iyo baarlamaanka xiga ay xalliyaan arrimaha dastuurka.

Dhanka kale, baarlamaanka federaalka ah ayaa wax-ka-baddel ku sameeyey labo qodob, oo dastuurka ah oo kala ah qodobka 60-aad iyo qodobka 136-aad, si dalku uu sharciyad la'aan uga fogaado xilliga kala guurka ah, islamarkaana masuuliyadda aftida loo qaadayo dastuurka loogu gudbiyo baarlamaanka 10-aad. Qodobka 60-aad ee dastuurku waxa uu sheegayaa in muddada baarlamaanka ay ku egtahay afar sano, taasoo ay micnaheedu tahay in baarlamaanka sharciyaddiisu dhamaaneyso 19-ka Agoosto. Beddelka lagu sameeyay dastuurka ayaa u qornaa "in muddada baarlamaanka federaalka ah ay dhamaanayso maalinta la dhaariyo baarlamaanka xiga".[25]

Qodobka labaad ee labeddelay ayaa ahaa qodobka 136-aad. Qodobkan waxa uu u qornaa haddii afti dadweyne "Dastuurka Kumeelgaarka ah loo qaado kahor dhammaadka kalfadhiga koowaad ee muddo-xileedka Golaha Shacabka, muwaadiniinta Jamhuuriyadda Federaalka ayaa cod aqlabiyad ah ku ansixinaya nuqulka cusub ee dastuurka". Maadaama afti dadweyne aanay suuragal ahayn, isbeddelka lagu sameeyay waxa uu u dhignaa in afti dadweyne la qaban doono kaddib marka uu baarlamaanka 10-aad beddelo midka 9-aad.[26]

Xildhibaannada ayaa ugu codeeyay labada isbeddel cod bixin qarsoodi ah. Maaddaama dastuurku uu amrayo cod ah saddex meelood labo 2/3 ama cod aqlabiyad ah (184) si qodob dastuurka ka mid ah loo beddelo, in hal kalfadhi

[23] Marka la eego dhammaan siyaasiyiinta qeybta ka ahaa hannaanka dastuur sameynta, Jawaari waxa uu ahaa shaqsiga ugu saameynta badan lamana uu kulmeynin beesha caalamka oo kaliya balse waxa uu si weyn ula shaqeynayay guddiga lasocodka; baarlamaanka 10-aad-na waa in aanu u qaadan in kaalinta Jawaari ay beddeleyso masuuliyadahooda.

[24] Wardheer News, *The National Leaders Forum Communiqué*, April 9-12, 2016, http://www.wardheernews.com/wp-content/uploads/2016/04/NLF-Communique-Final-April-12-2016.pdf

[25] Goobjoog, *Somali federal Parliament amends articles in Provisional constitution*, June 15, 2016, http://goobjoog.com/english/somali-federal-parliament-amends-articles-in-provisional-constitution/

[26] Ibid.

ay soo xaadiraan tiro ka badan 184 xildhibaan ayaa adkaatay. Xubin katirsan Baarlamaanka Federaalka ah oo aan wareysannay ayaa noo sheegay in Guddoomiyaha Baarlamaanka uu soo jeediyey in saddex maalin loo codeeyo labada qodob (Sabti, Isniin, iyo Arboco) si loo gaaro tirada codeeyaasha loo baahan yahay. Hirgelinta cod bixinta noocan ah waxa ay uga baahnayd xildhibaannada in ay codkooda bixiyaan kadib marka ay soo galaan xarunta baarlamaanka, warqadda soo xaadiritaankana ay saxiixaan. Codeyntii kaddib, 208 xildhibaan ayaa u codeysay isbeddelka 15-kii Juun 2016.[27] Inkasta oo go'aankan uu siinayo baarlamaanka sharciyad ay kusii shaqeeyaan ilaa baarlamaanka xiga lagasoo dooranayo, Madasha Hoggaanka Qaran waxa ay kulan ku qabsoomay Muqdisho bishii Agoosto ku kordhiyeen muddada laanta fulinta ama xukuumadda oo ay gaarsiiyeen ilaa dhamaadka Oktoobar.[28]

## Nuxurka Dastuurka: Arrimaha La isku Hayo

Qaraar kasoo baxay baarlamaanka, oo la ansixiyay Juulaay 2015, ayuu baarlamaanku u wareejiyay Madasha Hoggaanka Qaran qaar kamid ah afarta arrimood ee ay dastuurka u qaybiyeen. Inkasta oo xubnaha baarlamaanka qaar aan wareysannay ay su'aal geliyeen go'aankan, baarlamaanka waxa uu soo saaray qaraar u qeybiyay dib-u-eegista dastuurka afar qeybood: arrimo farsamo, arrimo siyaasadeed oo muhiim ah, meelo gaabis ku jiro oo u baahan in la buuxiyo, iyo arrimo cakiran ee u baahan wadaxaajood dhab ah iyo wadahadal siyaasadeed. Qaraarka waxa uu siiyay Madasha Hoggaanka Qaran awoodda wadaxaajoodka iyo go'aan ka gaaridda arrimaha siyaasadeed ee cakiran.

Waxaa muuqata in madasha hogaamiyayaasha aanay ka wada xaajoon arrimahan oo dhan. Sikastaba ha ahaatee, arrimaha siyaasadda ee lagu kala aragtida duwan yahay ee ku jira dastuurka kumeelgaarka ah oo la tilmaamay in ay muhiim tahay in siyaasiyiinta heer qaran iyo kuwa heer gobol ay ka wada xaajoodaan waxa ay kala yihiin: qaybsiga awoodaha iyo masuuliyadda u dhexeeya maamullada heer qaran iyo heer gobol; qaybsiga khayraadka iyo dakhliga; awoodaha madaxweynaha iyo kuwa ra'iisul wasaaraha; awoodaha metelaad ee labada aqal ee baarlamaanka; maqaamka Muqdisho; jinsiyadda; iyo qaab dhismeedka garsoorka.

### Hirgelinta Federaalka: Hoggaamiyeyaasha Heer Gobol

Machadka Heritage waxa uu qoraallo ka sameeyay hannaanka federaalka looga hirgelinayo dalka Soomaaliya.[29] Inkasta oo Soomaalidu ay muujiyeen aragtiyo kala duwan ee ku aaddan ku habboonaanta federaalka ee dalka, waxa aan soo jeedinney in la taageero federaalka. Balse, su'aalo dhowr ah ayaan weli laga jawaabin. Gaar ahaan hogaamiyayaasha siyaasadda ee hadda waxa ay ku kala aragti duwan yihiin tirada maamullada gobollada, in federaalku noqdo mid awoodo siman siinaya gobollada iyo in ay kala awoodo badanayaan, iyo awoodaha ay yeelanayaan labada heer ee dowladda.

Dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu ku saleysan yahay hannaan federaal oo leh labo heer dowladeed: heer dowladda federaalka iyo heer maamullada xubnaha ka ah dowladda.[30] Dastuurku si cad uma qeexin qaar kammid ah su'aalaha ugu muhiimsan ee dowladnimada. Tusaale ahaan, dastuurku si cad uma sheegayo tirada maamullada xubnaha ka noqonaya federaalka. Dastuurku waxa uu farayaa in labo gobol iyo wixii ka badan ee katirsan 18-kii gobol

[27] Ibid

[28] Villa Somalia, *Communiqué-National Leadership Forum*, August 10, 2016, http://www.villasomalia.gov.so/communique-national-leadership-forum/

[29] Cilmibaaris uu Machadka Heritage ka sameeyay shan magaalo (Muqdisho, Baydhabo, Kismaayo, Gaakacyo, iyo Garoowe)iyo xog uruurin laga sameeyay 213 qof lagu weydiinayo hannaanka hirgelinta federaaka, Febraayo 2015, http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2015/02/HIPS-Briefing-Federal-Somalia-ENG-3.pdf

[30] Qodobada 48 iyo 50 ee dastuurka kumeelgaarka ah

ee dalka ka jiray kahor 1990-kii in ay si iskood ah isugu biiri karaan, si ay maamul u sameystaan.[31] Waxa uu si cad u sheegayaa in xuduudaha gobolada ay ahaan doonaan sidii ay ahaayeen 1990-kii[32], inkasta oo uu jiro qodob tilmaamaya samaynta guddiga xudduudaha oo ay shaqadiisu tahay in uu xalliyo murannada xuduudaha.[33] Baarlamaanka Federalaka Soomaaliya waxa ay ahayd in uu sameeyo Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka oo ay shaqadiisu noqoneyso in uu talooyin ka bixiyo soohdimaha maamul goboleedyada. Balse mid kamid ah caqabadaha uu wajahay guddigan waxa ay ahayd inta badan maamullada gobollada sida Somaliland (1991) iyo Puntland (1998) iyo kuwa dhawaan sameysmay ee Jubaland iyo Koonfur Galbeed in ay ka horreeyeen yegleeliddii guddigan oo howl bilaabay Juulaay 2015-kii[34].

## Somaliland (Kon-federaal ama Federaal aan Awoodaha Loo Sinneyn)

Somaliland oo ahayd dhul uu Ingiriisku gumaysanayey waxa ay xorriyaddooda qaateen 26-kii June 1960-kii. Dhulkaas Soomaalidu u taqaannay Woqooyiga Soomaaliya, 1-dii Juulaay1960 ayay la midowday Koonfurta Soomaaliya oo loo yaqaannay Italian Somaliland. Kadib dagaallo qaraar oo muddo socday oo magaalooyin sida Hargeysa loo isticmaalay diyaarado dowladda Soomaaliyeed ay lahayd oo duqeeyey – taas oo ay ka dhalatay dhimashada dad badan – Somaliland waxa ay go'aansatay 18-kii May 1991 in ay ka go'do Soomaaliya inteeda kale. Wakhtigaas wixii ka danbeeyey, waxa uu maamulkani u shaqeynayey sidii dal madax bannaan oo kale. Maamulka Somaliland waxa uu qabtay doorashooyin heer madaxweyne, kuwo baarlamaan iyo doorashooyin golayaal deegaan, kuwaas oo guulo ku dhammaaday. Waxa uu sidoo kale maamulku leeyahay lacag u goonni ah, nidaam sharci, ciidan iyo baasaboor.[35] Sikastaba ha ahaatee, weli ma jiro dal u aqoonsaday Somaliland in ay tahay dal madaxbannaan oo iskiis u taagan. Taasi waxaa dheer, tan iyo markii ay midnimadii Soomaaliya ka laabatay 1991, maamulka Somaliland qeyb kama aanu ahayn shirarkii loo qabanayey Soomaaliya iyo hannaanka dastuur sameynta inkasta oo shaqsiyaad ka soo jeedey deegaannada Somaliland ay qeyb ka ahaayeen baarlamaannada iyo dowladaha Soomaaliya ee fadhigooda ahaa Muqdisho.

Halka Somaliland ay dooneyso in ay ka go'do Soomaaliya inteeda kale, dowladda Soomaaliya ee xarunteedu tahay Muqdisho waxa ay u aragtaa Somaliland in ay tahay mid kamid ah gobollo badan oo qeyb ka noqon doono dowladda federaalka Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, dad badan oo midnimada Soomaaliya aaminsan oo kasoo jeeda Somaliland waxa ay soo jeediyeen hannaan kon-federaal ama federaal ah[36] oo ay ku midaysan yihiin Woqooyi ama Somaliland iyo Soomaaliya inteeda kale. Boqortooyada Ingiriiska, Imaaraadka Carabta iyo Turkiga ayaa maalgeliyay wadaxaajoodyo u dhexeeya Somaliland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya, laakiin wada-xaajood dhab ah ee ku aaddan maqaamka Somaliland ee siyaasadda Soomaaliya weli ma bilaaban.

Saddex aragti ayaa ugu cad cad doodaha ka jira arrinta la xiriirta midnimada ama gooni isku taagga Somaliland: i) in Somaliland Soomaaliya inteeda kale ay ka go'do, ii) kon-federaal ama federaal oo ay awoodaha gobolladu kala badan yihiin in la sameeyo, iyo iii) iyo in la qaato federaal awoodaha gobollada siman yihiin oo ka

[31] Qodobka 49(6) ee dastuurka kumeelgaarka ah
[32] Qodobka 49(5) ee dastuurka kumeelgaarka ah
[33] Qodobka 49 (2) waxa uu sheegayaa in baarlamaanka federaalka uu sameyn doono guddiga xuduudaha, kaasi oo khilaafsan faqrada 5aad ee isla qodobkaasi oo tilmaameysa xuduudihii gobollada ee 1991 in ay aasaas u noqon doonaan maamul goboleedyada.
[34] Goobjoog Radio, *Somali Parliament approves Electoral and Boundaries and Federation Commissions*, July 6, 2015, http://goobjoog.com/english/?p=15555

[35] Mary Harper, *Somaliland: Making a success of 'independence'*, May 18, 2016,http://www.bbc.com/news/world-africa-36300592
[36] Dr. Afyare Cilmi, "Decentralization Options for Somalia,"*Heritage Institute for Policy Studies (HIPS)*, January (2014), http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2014/01/Decentralization_Options_for_Somalia-ENGLISH.pdf

dhigaya Somaliland maamul la siman maamul goboleedyada kale ee dalka.

### Puntland: Maqaam Gaar ah

Puntland waa gobol is-xukuma oo la dhisay bishii Agoosto1998. Sida Somaliland, Puntland kuma dhawaaqin in ay ka go'eyso Soomaaliya. Balse maadaama la dhisay kahor dowladda Federaalka, Puntland waxa ay isu aragtaa in ay tahay maamul-dowladeedka keliya ee xubinta ka ah dowladda federaalka ah. Sidaas darteed, inkasta oo ay jirto in Muqdisho isqabqabsi kala dhexeeyo, Puntland waxa la dhihi karaa waa maamulka ugu saameynta badan qoridda iyo dib-u-eegista dastuurka, iyada oo xoogga saartay in hannaan federaal ah laga hirgeliyo dalka. Kahor dhammaadkii xilligii kumeelgaarka, Puntland waxa ay martigelisay labo shir oo looga hadlayay dastuurka, Garoowe 1 iyo Garoowe 2. Sida aan ku ogaannay waraysiyo aan la yeelannay siyaasiyiin Puntland kasoo jeedda, Puntland waxa ay isku aragtaa in ay tahay maamul qaan-gaar ah sidaasi darteedna waxa ay xoogga saartaa in ay danaheeda ka hesho dowladda federaalka. Faltanka gobolkan waxa uu ka careysiiyaa xubno katirsan federaalka oo u arka Puntland in ay u muuqato maamul kale oo raba in uu Soomaaliya ka go'o. Qaar kamid ah xeeladaha Puntland waxa ay muujinayaan in gobolku uu rabo in federaalku noqdo mid awoodaha gobollada kala badan yihiin (asymmetric federalism).

### Maamullada Kumeelgaarka ah

Maamulkii kumeelgaarka ugu horreeyay waxa uu ahaa Jubaland oo dhismay bishii Agoosto 2013. Bilowgii hore, Dowladda Federaalka waxa ay kasoo horjeesatay sameysanka Jubaland ilaa Itoobiya/IGAD kala dhexdhexaadisay, islamarkaana ay xal meel dhexaad ah ku heshiiyeen labada dhinac. [37] Waxa xigay sameynta maamulka Koonfur Galbeed bishii Juun 2014 iyo maamulka Galmudug bishii Juulaay 2015. Inkasta oo qaar kamid ah odayaasha dhaqanka gobalka Hiiraan ay diideen in ay ka qeyb galaan, haddana maamulka kumeelgaarka ah ee Hirshabeelle waxa la unkay bishii Oktoobar 2016.

Haddaba, inkasta oo gobolladu ay ku kala duwan yihiin tirada dadka ku nool iyo juqraafi ahaanba, dastuurka kumeelgaarka waxa uu u arkaa gobollada oo dhan in ay siman yihiin islamarkaana leeyihiin maqaam, metelaad iyo awoodo isku mid ah (symmetric federalism). Marka arrinkan loo eego, iyada oo aan la fiirineyn hannaanka ay ku sameysmeen, waxa hadda jira lix gobol oo kala jooga marxalado kala duwan: Puntland, Galmudug, Koonfur Galbeed, Jubaland iyo Hir-Shabelle. Somaliland waa maamul gaar ah oo ay beesha caalamku u sameysay hab gaar ah oo ay horumakeeda ku taageeraan. Gobollada Sool iyo Sanaag waxa isku heysta Puntland, Somaliland iyo Khaatumo oo ah maamul aan weli awood u yeelan in uu noqdo maamul madax bannaan sababo la xiriira cadaadiska militari iyo siyaasadeed ee kaga imaanaya Somaliland iyo Puntland. Maqaamka Muqdisho weli lama go'aamin. Inta uu socday shirkii Madasha Hoggaanka Qaran ee lagu qabtay Kismaayo, waxa la go'aamiyay in xubnaha aqalka sare ee Somaliland iyo Puntland la siiyo kuraas dheeri ah (11 kursi maamul kasta) marka loo eego maamullada kale oo helay min siddeed kursi, waxaana isleennahay tallaabadaasi ma noqon doono mid xallida doodda Somaliland.

## Qaybsiga Awoodaha, Khayraadka iyo Masuuliyadaha

Dastuurka qabyada ah waxa uu u qaybinayaa awoodaha iyo masuuliyadaha Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka. Dastuurka waxa uu si gaar ah u siinayaa Dowladda Federaalka ah awoodaha iyo masuuliyadaha arrimaha dibadda, difaaca,

[37] Machadka Heritage waxa uu soo saaray warbixin faafaahsan ee la xiriirta isqabqabsiga waxa uuna soo jediyay talooyin meel dhexaad ah, http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2013/06/HIPS_Policy_Brief_004-2013_ENGLISH.pdf

socdaalka iyo jinsiyadaha, iyo siyaasadda lacagta. Waxa intaa sii dheer, in uu dastuurku dalbanayo in wadahadal dheeraad ah laga galo qaybsiga awoodaha, masuuliyadaha iyo khayraadka.[38]

Guddiga Lasocodka dastuurka ee baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa ay si kala goonni ah u dhameystireen dib-u-eegista dastuurka.[39] Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa uu dib-u-eegis ku sameeyay cutubyto katirsan dastuurka waxa uuna u gudbiyay Guddiga Lasocodka ee baarlamaanka oo isaguna dib-u-eegis ku sameeyey qoraalkii ay usoo gudbiyeen guddiga madaxa bannaan, kadibna u gudbiyay baarlamaanka. Nuqulka ugu danbeeyay ee dastuurka ee uu soo diyaariyey Guddiga Lasocodka, oo ah nuqulka uu baarlamaanka 10-aad ku shaqeyn doono, waxa uu dhigayaa in awoodaha dowladda lagu daro heer saddexaad oo ah heerka dowladaha hoose. Aragtida ka danbaysa arrinkan waxa ay tahay, sida aan ku ogaannay wareysiyo aan la yeelannay xubno katirsan guddiga, in maamullada gobollada aanay dowladaha hoose u daadajinin awoodihii. Guddiga waxa uu kusoo gunaanaday in ay lagama maarmaan tahay in damaanad qaad dastuuri ah la siiyo dowladaha hoose.

Intaa waxaa dheer, labada guddi waxa ay dib-u-eegis ku sameeyeen cutubka shanaad ee dastuurka – Daadajinta Awoodaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Guddiga Lasocodka ee baarlamaanka, oo isagu leh awoodda dib u eegista qoraallada guddiga madaxa bannaan, waxa uu wax-ka-beddel ku sameeyay una gudbiyay baarlamaanka soo jeedin awood qeybsi cusub. Sida ku xusan qodobka 57-aad ee dukumintiga cusub ee Guddiga Lasocodka, dowladda dhexe waxa ay si gaar ah sharciyeyntooda iyo fulintooda u yeelaneysaa 24 awoodood. Waxa awoodahaasi kamid ah: arrimaha dibadda, difaaca, siyaasadda lacagta, bangiga dhexe, jinsiyadaha, gaadiidka (cirka, waddooyinka waaweyn, iyo tareennada), adeegga boostada iyo isgaarsiinta, sharciga badda, arrimaha la xiriira danbiyada abaabulan, arrimaha la dagaallanka burcad badeedda, horumarinta dhaqaalaha, caafimaadka, waxbarashada, cilmibaarista iyo tiknoolojiyada, dhulka iyo kheyraadka dabiiciga ah, webiyada iyo haraha isku xira labo gobol iyo wixii ka badan, doorashooyinka iyo xisbiyada siyaasadda, xuquuqda daabacaadda, soo saaridda sharciyada xaaladaha degdegga ah, lahaanshaha hubka, canshuurta, iyo garsoorka.

Waxaa intaa dheer, Guddiga Lasocodka ee baarlamaaku waxa uu soo jeediyay in maamullada gobollada ay si gaar ah u yeelanayaan sharciyeynta iyo maamulidda toddobo arrimood. Awoodahan waxa kamid ah: samaynta iyo hirgelinta dastuur waafaqsan dastuurka federaalka; sameynta maamullo dimuqraaddi ah oo ku saleysan ku dhaqanka sharciga; qorshaha horumarinta; maamulidda gobollada; canshuurta ilaha dakhli ee maamullada gaarka u ah; sharciyeynta iyo maamulidda shaqaalaha rayidka gobollada; iyo samaynta ciidamada booliska maamul goboleedka.

Guddiga dib-u-eegistu ma xusin awoodo ay dowladda federalka iyo maamul goboleedyada isla wadaagi karaan. Waxaase jira arrimo ay labada heer ee dowlad iska kaashan karaan. Waxaa kamid ah beeraha, soo saarista tamarta, ganacsiga, guurka, howdka iyo ilaalada duurjoogta. Dowladda Federaalka waxa ay tusaale ahaan dejin kartaa sharciyada halka ay maamulladu qaadi karaan masuuliyadda fulineed. Sidaas darteed, in la qeexo, laguna heshiiyo, islamarkaana la qodobeeyo awoodo u gaar ah dowladda federaalka, awoodo u gaar ah maamul goboleedyada iyo awoodo wadaag ah dastuurkana lagu qoro waxa ay muhiim u tahay

[38] Qodobka 54 ee dastuurka

[39] Hannaanka waxa uu ahaa mid khilaaf badan oo labada guddi ee dastuurka si kala madax bannaan ayay u shaqeeyeen. Xildhibaan metelayay Puntland ee kamid ahaa Guddiga Lasocodka Baarlamaanka uu mar ka baxay wadahadalka warbaahintana ka sheegay dhaliil uu u jeedinayo hannaanka, http://idilnews.com/2016/05/12/video-xildhibaan-seed-oo-qaylo-dhaan-ka-soo-saaray-farataysiga-dastuurka-fadaraalka-lagu-hayo/

yegleelidda Soomaali mideysan, awooddaha dowladda oo la daadajiyey islamarkaana leh hay'ado heer federaal, maamul goboleed iyo dowlado hoose oo shaqeynaya.

Sikastaba ha ahaatee, xaaladda dhabta ah ee dalka ka jirta waxa ay ka duwan tahay soo jeedinta Guddiga Lasocodka. Sida uu hadda xaalku yahay, qaar kamid ah maamullada gobolada, haddii aanay dhammaantood ahayn, waxa ay u shaqeeyaan sidii in ay yihiin maamullo madax bannaan oo kale. Waxa ay leeyihiin wasiiro, baarlamaan, iyo calamo. Waxa ay maamulaan arrimahooda gudaha. Waxa ay la heshiisyo la galaan dowladaha deriska ah iyo beesha caalamka iyaga oo leh wakiillo metela. Somaliland iyo Puntland marka laga reebo, maamullada kale midkoodna ma sheegan maqaam gaar ah. Inkasta oo ay mararka qaar ay isku dhacaan dowladda federaalka islamarkaana jeclaan lahaayeen in ay awoodo badan helaan intii suuragal ah, siyaasiyiinta maamullada kumeelgaarka ah waxa ay muujiyeen in ay doonayaan in la sameeyo nidaam federaal oo ay awoodaha maamullada oo ay ku jiraan Somaliland iyo Puntland ay wada siman yihiin. Haddana, markii lagu kulmay Kismaayo bilowgii sanadkii 2016, waxa ay ku heshiiyeen in loo oggolaado in lix xubin dheeraad ah aqalka sare loogu daro Somaliland iyo Puntland.

## Nidaam Madaxweyne mise Mid Baarlamaani ah

Nidaamyada baarlamaaniga ah iyo kuwa madaxweyne ku salaysan ayaa ah qaab dhismeedyada dowladeed ee dunida aadka looga isticmaalo. Nidaamka baarlamaaniga ah waxa uu is dhex gelinayaa awoodaha fulinta iyo kuwa sharci dejinta. Sidaas si ka duwan, nidaamka madaxweynuhu yahay awoodda dalka ugu sarraysa, waxa uu ku saleysan yahay kala soocidda awoodaha laamaha sharci dejinta iyo kuwa fulinta ee dowladda. Nidaam saddexaad oo aan aad loo isticmaalin ayaa ah mid u eg nidaamka madaxweynuhu hormuudka yahay, waxa uuna isku keenayaa nidaamyada madaxweyne iyo kan baarlamaanka, waxa uuna abuurayaa madaxweyne iyo ra'iisul wasaare leh awoodo badan oo fulineed.[40]

Dastuurkii Soomaaliya ee 1960-kii waxa uu qaatay nidaam u eg midka madaxweynaha. Baarlamaanku waxa uu dooranayay madaxweynaha oo isagu leh awoodda soo xulidda iyo xil ka qaadista ra'iisul wasaaraha.[41] Si kale haddii loo dhigo, si uu ra'iisul wasaarahu u shaqeeyo waxa laga doonayey in uu haysto kalsoonida madaxweynaha iyo midda baarlamaanka. Kacaankii 1969-kii ayaa beddelay nidaamkan, waxa uuna la yimid nidaam madaxweyne ee uu Generaal Maxamed Siyaad Barre ka ahaa hoggaamiyaha kacaanka, xoghayaha guud ee xisbiga talada haya iyo madaxweynaha dalka. Kacaanka waxa uu awoodihii kusoo uruuriyay dowladda dhexe, dalkana waxa uu ka maamulayay Muqdisho. Awoodda oo dowladda dhexe lagu uruuriyay waxa ay keentay dagaallo sokeeye ee aad u ba'an oo ugu danbeyn burburiyay dowladdii Soomaaliya sanadkii 1991.

Sanadkii 2000, markii ugu horreysay, siyaasiyinta Soomalaiya waxa ay heleen fursad ay uga doodaan qaab-dhismeedka ku habboon hay'adda fulinta dowladda markii ay ku kulmeen shirkii lagu qabtay Carta ee dalka Jabuuti. Guddigii soo qoray axdigaas, waxa uu ku heshiiyey in dib loogu laabto dastuurkii 1960-kii, wax yarna laga beddelo, waxa uuna guddiga soo jeediyay in axdigu uu noqdo mid u eg qaab madaxweyne oo ay madaxweynaha dooranayaan xubnaha baarlamaanka, madaxweynuhuna uu magacaabayo ra'iisul wasaaraha. Balse guddiga waxa ay go'aansadeen in meesha laga saaro awoodda uu madaxweynaha u leeyahay in uu ra'iisul wasaaraha xilka ka qaado, si looga fogaado nidaam madaxweyne kale oo awoodihii

[40] Peter Harris and Ben Reilly, "Democracy and Deep-Rooted Conflict: Options for Negotiators,"*International Institute for Democracy and Electoral Assistance*, (1998),http://www.idea.int/publications/democracy_and_deep_rooted_conflict/upload/ddrc_full_en.pdf

[41] *Dastuurka Jamhuuroiyadda Soomaaliya*, la qaatay sanadkii 1960,http://www.ilo.org/dyn/travail/docs/2176/Constitution1960.pdf

oo idil uu uruursado, taasi oo ku hoggaamin karta dalka xukun kale oo kaligii talis ah.

Muddo 16 sano ah, Soomaaliya waxa ay isticmaaleysey hannaankan oo ah mid aan dersid cilmi ku dhisan kaddib la dooran. Tan iyo xiligaas, dalka waxa soo martay shan madaxweyne: Cabdiqaasim Salaad Xasan, Cabdullaahi Yuusuf Axmed, Shariif Sheekh Axmed, Xasan Sheekh Maxamuud iyo Maxamed Cabdullahi 'Farmaajo'. Waxa xusid mudan, marka laga reebo 'Farmaajo' oo dhawaan la doortay, in madaxweyne kasta ay iska hor-yimaadeen ra'iisul wasaarayaashii uu magacaabay. Ilaa 12 ra'iisul wasaare ayaa la magacaabay tan iyo sanadkii 2000 - madaxweyne kasta waxa uu magacaabay saddex ra'iisul wasaare.[42] Arrinkan waxa uu muujinayaa in ay jirto dhibaato dhanka nidaamka ah. Dastuurka Kumeelgaarka ah waxa uu awoodaha fulinta siinayaa Golaha Wasiirrada ee uu hoggaamiyo ra'iisul wasaaraha. Dhinaca kale, dastuurka waxa uu Madaxweynaha siinayaa tiro awoodo fulineed ah, taasi oo abuuraysa jahwareer. Taas waxaa dheer, baarlamaanka waxa uu dooranayaa madaxweynaha halka uu maxadweynaha soo magacaabayo Ra'iisul Wasaaraha. Labadaba, (Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaraha) mid ay shacabka soo dooranayaan kuma jiro. Dastuurka qabyada ah ee Soomaaliya ma tilmaamayo in madaxeynaha ay shacabku soo doortaan. Intaa waxaa dheer, dastuurka waxa uu awood u siinayaa madaxweynaha uu soo doortay baarlamaanku in uu magacaabo ra'iisul wasaaraha uu isagu doonayo. Waxa intaa kasii muhiimsan, dhaqanka siyaasadda Soomaaliya waxa uu ku qotomaa madaxweyne awood badan – arrinkan oo muujinaya in jagada siyaasaadda ugu sarreysa oo ay siyaasiyiinta doonayaan dadkuna ay doonayaan in ay la macaamilaan – in ay tahay jagada madaxweynaha.

Natiijooyinka ka dhashay hay'adda fulinta dowladda oo kala qeybsan (madaxtooyada iyo golaha wasiirada) waxa ay ahaayeen kuwo aan wanaagsanayn. Kuwaas oo ay kamid yihiin: golaha xukuumadda oo si joogto ah loo beddelo, in si aan sabab iyo aqoon ku qotomin loo nidaamiyo wasaaradaha, iyo musuqmaasuq baahsan oo soo wajahay hay'adda fulinta. Waa midda koowaade, Soomaaliya ma yeelanin xukuumad si dhab ah u shaqeysay afar sano. Xukuumdahaasi, qaar waxa ay xafiiska joogeen lix bilood oo keliya, halka qaar kalana ay shaqeeyeen ilaa labo sano - inta badan waxa saameyn ku yeeshay khilaafka madaxweynaha iyo raysal wasaaraha. Tan labaad, wasiirrada waxa loo magacaabayay qaab aan baahida bulshada ku salaysnayn, sababta oo ah ra'iisul wasaarayaashu waxa ay doonayaan in ay helaan kalsoonida baarlamaanka. Xildhibaanada badankooduna waxa ay doonayeen in ay saameyn ku yeeshaan shaqsiyaadka kamid noqonaya golaha wasiirrada.

Mararka qaar ra'iisul wasaarayaasha waxa ay sameeyeen gole fulin ama xukuumad ballaaran. Sanadkii 2005-tii, Ra'iisul Wasaare Cali Maxamed Geeddi waxa uu magacaabay ku dhawaad 100 wasiir, wasiiru dowlayaal iyo wasiir ku xigeenno.[43] Xilligii Ra'iisul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon, waxa shaqeynayay 10 wasiir federaal ah oo keliya. Ra'iisul Wasaarihii beddelay ee Cabdiweli Sheekh Maxamed-na waxa uu ku dhawaaqay shan iyo labaatan wasiir, shan wasiiru dowle, iyo shan iyo labaatan wasiir ku xigeen (55 isu geyntooda).

Marka ay madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha iska horyimaadaan, waddada keliya ee furneyd waxa ay ahayd in la musuqmaasuqo xildhibaannada si midkood ay meesha uga saaraan, inta badanna ra'iisul wasaaraha ayaa la ridayey.

Siyaasiyiinta Soomaalida, aqoonyahannada iyo shacabka guud ahaan waxa ay arkaan aragtiyo

[42] Warbixin Kooban ee uu Machadka Heritage ka Qoray Cawaaqibta Hardanka Siyaasadeed, December 2013, http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2013/12/HIPS_Policy_Brief_006-2013_ENGLISH-1.pdf

[43] Ka eeg halkan magacyada wasiirrada, wasiiru dowlayaasha, iyo wasiir ku xigeennada http://www.somalitalk.com/2005/jan/7jan25.html

kala duwan ee ku aaddan qaab dhismeedka dowladeed ee ku habboon dalka. Qaar kamid ah siyaasiyiinta iyo hoggaamiyayaasha gobollada waxa ka go'an in lasii isticmaalo hannaanka golaha fulintu uu qeybsanyahay, oo laba shaqsi oo kasoo kala jeeda qabaa'illo kala duwan ay ku fariisanayaan labada kursi ee madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha.

Ku kala aragti duwanaanshaha arrinkan waxa uu ahaa arrinta ugu weyn ee keenay in dib-u-eegista iyo dhameystirka dastuurka dib loo dhigo. Saddex kamid ah siddeeda xubnood oo ay ka koobneyd Madasha Hoggaamiyayaasha Qaran waxa ay dareemeen in isbeddelka lasoo jeediyay ee ah in loo guuro nidaam madaxweyne uu sii wiiqayo awoodda ama saamaynta siyaasadeed ee beelaha aan Hawiyaha ahayn. Siyaasiyiintan waxa ay qabeen in golaha fulinta ee qeybsan oo lagusii dhaqmo ay isku dheellitireyso awoodaha qabaa'ilka. Intaa waxaa dheer, isku dheellitirka awoodaha siyaasadeed ee beelaha waaweyn in ay tahay sababta keentay hannaanka 4.5 ee awood qeybsiga beelaha.

Beelaha Digil iyo Mirifle ayaa helayay jagada afhayeenka baarlamaanka, halka beelaha Hawiye iyo Daarood ay isku beddelayeen jagooyinka madaxweynaha iyo midda wasiirka 1-aad. Beesha Dir waxa la siinayay jagada ku xigeenka ra'iisul wasaaraha iyo guddoomiyaha maxkamadda sare. Beelaha la sheego in laga tiro badan yahay (inkasta oo tirakoob sax ah aan Soomaaliya laga sameyn) waxa ay helayeen ku xigeennada afhayeenka baarlamaanka iyo jagooyin wasiirro ah.

Siyaasiyiin iyo ogaal-leey kale waxa ay ku adkeysanayaan in golaha fulinta ee qeybsan uu ku guul darreystay in uu Soomaaliya ka shaqeeyo, waxa ayna soo jeediyeen in loo guuro nidaam madaxweyne. Dadka taageersan aragtidan waxa ay ku doodayaan in nidaamkan uu keenayo gole fulin oo xasilloon oo shaqeeya mudda-xileedkiisa, taasi oo dhammeyneysa hardankii awoodeed ee u dhexeeyay shaqsiyaadka ku fadhiya jagooyinka sar-sare ee golaha fulinta-qeybsan. Siyaasiyiinta Soomaaliya waxa ay yaqaaniin hannaankan sida taariikhda dalka iyo aragtida shacabka ka muuqata. Waxay ku doodayaan haddii hannaankaan la qaato in ay jirayso kala saarid cad ee awoodaha laamaha fulinta iyo sharci dejinta dowladda. Ugu danbeyn, dadka taageersan aragtidan waxa ay ku doodaan in shacabku heli doonaan fursad ay kusoo doortaan hoggaanka hay'adda fulinta dowladda, ama madaxwenaha.[44]

Iyadoo xaaladdan la qiimeynayo, Guddiga Lasocodka waxa uu ku taliyay in la qaato nidaam madaxweyne oo leh madaxweyne iyo kuxigeenno. Somaliland, Puntland iyo maamullada kumeelgaarka ah waxa u shaqeeyay oo ay isticmaalaan nidaam madaxweyne kaasi oo keenay hannaan leh go'aan qaadasho xasiloon.

Machadka Heritage waxa uu aaminsan yahay in habka ugu wanaagsan oo ay hardanka madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha uu ku dhammaan karo in uu yahay in dib loogu laabto dastuurkii 1960-kii, wax yarna laga beddelo. Taas oo ah, in awoodda madaxweynaha uu leeyahay lagu daro (ama lagu soo celliyo sidii nidaamku ahaa 1960-kii) in uu xilka ka qaadi karo ra'iisul wasaaraha. Tani waxa ay ku khasbeysaa ra'iisul wasaaraha in uu haysto labada kalsooni ee madaxweynaha iyo baarlamaanka. Machadka Heritage waxa uu sidoo kale arkaa in ay shacabka Soomaaliyeed si toos ah usoo doortaan madaxweynaha intii ay baarlamaanka dooran lahaayeen. Ra'iisul wasaaraha waa in uu ka hoos shaqeeyaa madaxweynaha, madaxweynahana waa in uu shacabka soo doortaa, taas ayaa sugi karta isla-xisaabtan dhab ah, xasilooni siyaasadeed iyo in uu dalka hormuud ka noqdo hoggaamiye matalaad buuxda ka haysta shacabka.

[44] Mahad Waasuge, *Presidential System: Exploring Future Somali Government Structure*, March 8, 2015,https://mahadbile.wordpress.com/2015/03/08/presidential-system-exploring-future-somali-government-structure/

## Naqshadda Labada Aqal ee Baarlamaanka

Marka laga reebo Somaliland, Soomaaliya waligeed ma yeelan baarlamaan labo aqal ka kooban. Dastuurkii 1960-kii waxa uu qaatay baarlamaan hal aqal leh. Xukunkii militariga waxa uu sidoo kale lahaa baarlamaan hal aqal leh. Heshiiskii Carta ee Djibouti ee sanadkii 2000 waxa uu isna sii joogteeyey baarlamaan hal aqal ah. Inkasta oo shirkii dib u heshiisiinta Soomaaliya ee Kenya lagu qabtay uu soo jeediyay in nidaam federaal ah la qaato, sharcidejin hal aqal ah ayaa weli la isticmaalayey. Qodobka 28 (2) ee datuurku waxa uu leeyahay "Baarlamaanka Federaalka Kumeelgaarka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya waxa uu yeelanayaa hal aqal."[45]

Sikastaba ha noqotee, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee sanadkii 2012 waxa uu soo jeediyay nidaam federaal ah oo ka kooban baarlamaan laba aqal ah. Aqallka Sare oo 54 mudane ka koobnaanaya, dastuurku waxa uu 18-kii gobol ee uu dalka lahaa (kahor dagaalladii sokeeye) midkiiba u qoondeeyey min saddex xubnood.[46] Aragti ahaan, sida ku xusan dastuurka, Golaha Shacabka waxa uu metelayaa muwaadiniinta, halka Aqalka Sare uu metelayo maamul goboleedyada.

Dastuurka Kumeelgaarka ah waxa uu siinayaa shaqooyin iyo waajibaad isku mid ah labada aqal. Labada aqal waxa ay kawada qayb-qaadanayaan doorashada iyo xil ka qaadista madaxweynaha, wax ka beddelka dastuurka, hannaanka sharci dejinta, magacaabidda guddiyada madaxa bannaan, iyo samaynta maxkamadda dastuuriga. Sanadkii 2012-kii, sameynta aqalka sare ma ahayn mid suuragal ah sidaas darteed waxa la go'aamiyay in dowladda iyo baarlamaanka cusub ay dhameystiraan hirgelinta federaalka iyo sameynta aqalka labaad.

Waxa jiray hal arrin oo hirgashay muddadii 2012-2016 ee la xirirta sameynta aqalka sare. Maamullo kumeelgaar ah oo cusub ayaa ka sameysmay koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya: Jubaland oo samaysantay 2013-ii, KoonfurGalbeed oo dhalatay 2014-kii, Galmudug oo la abuuray 2015-kii iyo Hirshabelle oo hirgashay 2016-kii. Balse, dowladda federaalka waxa ay ku guul darreysatay in ay dhammeystirto maqaamka Muqdisho. Maadaama ay maamullo dhismeen, 12-kii Abriil 2016 xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran waxa ay ku heshiiyeen lix qodob oo sharraxaya qaabka loo sameynayo aqalka sare. Sida ku cad war-murtiyeedka, masuuliyiinta xukuumadaha maamul goboleedyada ayaa u qeybinaya xubnaha aqalka sare qabaa'illada dega maamul goboleedka, waxa ayna labo musharrax ama kabadan u magacaabayaan kursi kasta. Baarlamaanka maamul goboleedka ayaa u codeynaya liiska musharraxiinta kursi kasta. Madaxweynaha maamul goboleed kasta ayaa kaddib saxiix ku aqbalaya xubnaha la doortay.[47]

Khilaaf laba heer ah ayaa ka jira sameynta Aqalka Sare. Waa midda koowaade, dad badan ayaa su'aal gelinaya xikmadda ka danbeysa in aqal labaad la sameeyo, iyaga oo ku doodaya in aqal labaad uu culeys keenayo marka loo eego maamullada ay metelaan iyo shaqooynka ay qabanayaan. Sida uu hadda xaalku yahay, xubnaha aqalka hoose waxa lagusoo doortay hannaanka 4.5. Kursi kasta oo kamid ah 275-ta kursi, odayaal dhaqameed ayaa jufooyinka kasoo xulay 51 ergo kuwaas oo dooratay xubin kasta oo baarlamaanka kamid noqday.

Tan labaad, xubnaha Aqalka Hoose waxa ay metelaan qabaa'ilka waaweyn ee maamul goboleedyada. Siyaasiyiinta beelaha waxa ay isku khilaafeen tirada loo qoondeynayo gobollada iyo shaqada iyo awoodaha uu yeelanayo aqalkan. Siyaasiyiinta waxa ay u qeybsameen qaab qabiil.

[45] ILO, *The Transitional Federal Charter of the Somali Republic*, Nairobi, February 2004 http://www.ilo.org/dyn/travail/docs/2177/Transitional%20Federal%20charter-feb%202004-English.pdf

[46] Qodobka 72 ee dastuurka

[47] Wardheer News, *The National Leaders Forum Communiqué*, April 9-12, 2016, http://www.wardheernews.com/wp-content/uploads/2016/04/NLF-Communique-Final-April-12-2016.pdf

Hoggaanka siyaasadda ee Daarood, Cabdiweli Gaas iyo Axmed Islaam, waxa ay soo jeediyeen Aqal Sare oo ku saleysan 18-kii gobol ee dalka. Waxa ay aaminsanaayeen in hannaankan beesha ay u dhasheen ay ugu tiro badnaan karaan aqalka sare. Siyaasiyiinta Hawiye, Cabdikariin Guuleed iyo Xasan Sh. Maxamuud, waxa ay sheegeen in ay doonayaan aqal sare oo ku saleysan maamul goboleedyada. Qaabkan, siyaasiyiinta Hawiye waxa ay tirada ugu badan ka helayaan Galmudug iyo Hirshabelle. Siyaasiyiinta Digil iyo Mirifle waxa ay ka hor yimaadeen labada soojeedin waxa ayna ku doodeen in 4.5 lagu kala qeybsado.

Weliba, warqad lala wadaagay beesha caalamka ayay siyaasiyiinta Digil iyo Mirifle waxa ay soo jeediyeen in odayaasha dhaqanka 135-ta ah ay noqdaan xubnaha aqalka sare. Xikmadda ka danbeysa arrinkan waxa ay ku saleysan tahay tixgelinta laba arrin oo muhiim ah. Tan koowaad, haddii soojeedinta siyaasiyiinta Daarood iyo Hawiye la aqbalo, siyaasiyiinta Digil iyo Mirifle waxa ay rumeysnaayeen in aqalka sare looga tiro badanaanayo. Midda labaad, siyaasiyiinta Daarood iyo Hawiye midkoodna ma siinayo metelaad barakacayaasha ku nool Puntland, Banaadir iyo Galmudug. Sidaas darteed, 1.2 malyan barakacayaal ah wax metelaad ah lagama siinin aqalka sare. Ugu danbeyntii, siyaasiyiinta Isaaq iyo beelaha Dir ayaa sidoo kale ka hor yimid soojeedinta Daarood iyo Hawiye. Iyaga waxa ay ku doodeen in federaalka uu noqdo mid u dhexeeya Somaliland iyo Soomaalida Koofureed, labada aqalna ay metelaan labadaas gobol.

Kaddib dhowr wadaxaajood oo aad u kulul, xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran waxa ay ku heshiiyeen in la hirgeliyo heshiiskii Kismaayo oo ay madashu ku go'aamisay in min siddeed xubnood la siiyo maamullada kumeelgaarka ah iyadoo Somaliland iyo Puntland loogu daray min saddex xubnood oo dheeraad ah.[48] Madaxda maamulladan ayaa labo qof ama ka badan oo metelaya beelaha gobolka soo xulay, kaddibna baarlamaanka maamulka ayaa codeyn ku doortay mid kamid ah musharraxiinta. Gole gaar ah oo ka kooban 46 xubin ayaa loo sameeyay si ay u doortaan xubnaha Somaliland ku metelaya aqalka sare.

Sikastaba xaalku ha noqdee, qaabkan loo dhisay aqalka sare ma aanu xallin cabashooyinkii ka imanayay beelaha aan metelaadda lahayn ama metelaad yar ka helay aqalka sare. Kulan ay yeesheen madaxda Madasha Hoggaanka Qaran Diseembar 2016, ayay waxa ay ku go'aamiyeen in tirada aqalka sare lagu kordhiyo 18 xubin lagana dhigo 72 mudane. Sida ku qeexan war murtiyeedka, xubnahan cusub waxa si siman loogu qeybinayaa lixda maamul.

Qaabka loosoo xulayo xubnahan cusub waxa ay ka duwan tahay qaabkii loosoo doortay 54-ta xubnood ee kale ee aqalka sare. Madaxweynayaasha maamul goboleedyada ayaa soo xulaya min saddex xubnood madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ayaana dikreeto ku ansixinaya.[49] Sikastaba ha noqotee, xubnahan cusub waxa ay khilaafsan yihiin dastuurka kumeelgaarka ah oo amraya in uu aqalka sare ka koobnaado 54 xubnood.

Hannaankani, sidoo kale, waxa uu keenayaa in labo nooc oo kala duwan lagusoo xulo xubnaha aqalka sare. 54-ta xubnood ee hore waxa lagusoo doortay qaab ay madaxweynayaasha maamul goboleedyadu kursi kasta usoo magacaabeen labo ilaa afar musharrax oo hal beel kasoo wada jeeda, baarlamaannada gobolladuna ay mid ka doorteen musharraxiinta.18-ka kale waxa soo xulayo madaxweynayaasha maamullada waxaana dikreeto ku ansixinaya madaxweynaha federaalka.

[48] Eeg warmurtiyeedka Madasha http://www.villasomalia.gov.so/communique-on-the-electoral-model-for-2016/

[49] Jowhar, *Akhirso: War murtiyeedkasoobaxayshirkiiMadashaiyo 18 xubnoodoolagukordhiyayAqalkaSare*, December 25, 2016, http://www.jowhar.com/akhirso-war-murtiyeed-ka-soo-baxay-shirkii-madasha-iyo-18-xubnood-oo-lagu-kordhiyay-aqalka-sare/

Siyaasiyiinta Soomaaliya iyo beesha caalamka ayaa kasoo horjeestey xubnaha cusub waxa ayna ku tilmaameen in aanay dastuurka waafaqsaneyn.[50] Madasha ayaa mar kale kulan yeelatay waxa ayna go'aan ku gaareen in xubnahan cusub la doorto kaddib doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka islamarkaana uu ra'iisul wasaaruhu ka codsado baarlamaanka in ay wax ka beddel ku sameeyaan qodobka 72-aad ee dastuurka.[51] Aragti ahaan, aqalka labaad waxa uu metelayaa beelaha kasoo jeeda maamul goboleedyada balse waxa soo xushay madaxweynayaasha maamul goboleedyada.

Labo hayb ama sumadood oo muhiim ah ayay tahay in nidaamka siyaasadda Soomaaliya uu daawo u helo kuwaasi oo kala ah qabiilka iyo muwaadinka. Welwelkii maamulka Koonfur Galbeed hadda wuu caddaaday. Xubnaha aqalka sare ee lagusoo doortay hannaanka aan kor kusoo sharraxnay ma waafaqayo halbeeggii awood qeybsi ee lagusoo dhaqmayay 16-kii sano ee lasoo dhaafay. Beelaha Daarood iyo Hawiye ayaa helay kuraasta ugu badan ee aqalka cusub.

Haddii baarlamaan labo aqal ah la doonayo in la joogteeyo islamarkaana si wacan uu uga shaqeeyo Soomaaliya, waa in uu xal u helaa labadaas baahiyood oo ah doonidda qabaa'ilka iyo baahida muwaaddinka. Aqalka labaad waa in uu metelaa qabaa'ilka. Tusaale ahaan, Somaliland waxa ay leedahay aqal sare oo metela beelaha. Aqalkan waxa uu kaalin muhiim ah ka qaatay xasiloonida gobolka tan iyo 1992. Tani waa khibrad loosoo weecin karo hay'adaha federaalka Soomaaliya. Beelaha Digil iyo Mirifle waxa ay soo jeediyeen in 135-tii oday dhaqan ee soo xulay 2012-kii xildhibaannada baarlamaanka laga dhigo xubnaha aqalka labaad. Laakiin xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran ayaa soo jeedintan diiday. Ugu danbeyntii, in la yareeyo awoodaha iyo masuuliyadaha aqalka labaad sida dalalka Ghana iyo Botswana waxa ay yareyneysaa khilaaf badan in uu yimaado.

Dhanka kale, aqalka hoose ama Golaha Shacabka waxa uu sanadka 2020 metelayaa muwaadiniinta isaga oo ku metelaya hannaan xisbiyo siyaasadeed oo ku tartama kuraasta xildhibaannada si metelaad siman ah. Tusaale ahaan, 275-ta mudane ee kamid noqonaya aqalkan waxa ku tartamayaa xisbiyo siyaasadeed. Muwaadin kasta iyada oo aan loo eegeyn meesha uu ku noolyahay ayaa u codeyn kara xisbiga siyaasadda uu doonayo. Xisbiyada siyaasadda ayaa liiska musharraxiinta u gudbinaya guddiga doorashada.Si xisbiyada siyaasadeed ay ugu guuleystaan doorashooyinka qaran, waa in ay gudbiyaan liis dheellitiran oo ay beelaha oo dhan, haweenka iyo dhalinytarada intuba ay ku jiraan.

## Maqaamka Muqdisho

Muqdisho waa magaalada ugu dadka badan Soomaaliya. Tirakoobka Qaramada Midoobay ee qiyaasta ah waxa uu ku qiyaasay dadka ku nool Muqdisho ilaa 1.6 malyan.[52] Magaaladu waxa ay ahayd caasimad iyo mid kamid ah magaalooyinka uu ka koobnaa gobolkii la oran jiray Banaadir, intii u dhexeysay 1954 iyo 1969.[53] Sikastaba ha ahaatee, xukunkii militariga waxa uu u qeybiyay Banaadir ilaa saddex gobol: Shabeellada Hoose, Shabeellada Dhexe iyo Banaadir-ta hadda la yaqaan, waxa uuna ka dhigay Muqdisho caasimadda dalka iyo gobol kamid ah gobollada dalka. Dastuurku waxa uu dalbanayaa labada aqal ee baarlamaanka federaalka (Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare) in ay soo saaraan

[50] UNSOM, "International Community Gravely Concerned Over Decisions of National Leadership Forum on Electoral Process," December 27, 2016, https://unsom.unmissions.org/international-community-gravely-concerned-over-decisions-national-leadership-forum-electoral-process

[51] Goobjoog, *National Leadership Forum Ask Amendments Article 72 Of The Constitution*, December 29, 2016, http://goobjoog.com/english/national-leadership-forum-ask-amendments-article-72-constitution/

[52] UNFPA, Population Estimate Survey for the Pre-war Regions of Somalia, October, 2014, http://somalia.unfpa.org/sites/arabstates/files/pub-pdf/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf

[53] Mohamed Trunji, *Somalia: The Untold History 1941 – 1969*, Leicester: Lohpressn 2015

sharci gaar ah oo sharraxaya maqaamka gaarka ah ee Muqdisho.

Baarlamaanka 9-aad ma aanay caddeyn maqaamka Muqdisho. Intaa waxaa dheer, xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran, waxa ay ku guuldarreysteen in ay ku heshiiyaan maqaamka Muqdisho. Madasha waxa ay sameysay guddi madax bannaan oo kasoo talo bixiya muddo lixdan maalmood gudahood ah maqaam gaar ah oo ay Muqdisho yeelato.[54] Dhammaadkii bishii Juun, xubnaha Madasha Hoggaanka Qaran ee ku kulmay Baydhabo waa ay ku heshiiyeen in laba kursi aqalka sare laga siiyo beelaha Banaadiriga. War-murtiyeedkii kasoo baxay kulankii Madasha Hoggaanka Qaran ee qabsoomay Sebteembar laguma caddayn maqaam gaar ah oo ay Muqdisho yeelato oo ay madaxda madashu ku heshiisay. Soojeedintii guddigii loo saaray ee ahayd in 15 xubnood aqalka sare laga siiyo Muqdisho lama qaadan. Sidaas si kaduwan, labadii kursi ee loo oggolaaday Reer Banaadir ayaa lagala laabtay xubnaha madashana waxa ay isla garteen in la dhaqan geliyo heshiiskii Kismaayo. Sidaas darteed, Muqdisho magaalo ahaan metelaad kuma lahan aqalka sare. Inkastoo bulshada Reer Banaadir iyo beelaha kale ee aan hubeysneyn aanay metelaad ku lahayn aqalka labaad, beelaha kale sida Daarood, Digil iyo Mirifle, iyo Hawiye waxa ay metelaad ku leeyihiin aqalka sare.

Marka laga hadlayo maqaamka magaalada Muqdisho ay ku yeelaneyso Soomaaliya oo federaal ah, doodaha arrintaas ku hareeraysan laba ra'yi ayaa ugu muhiimsan. Dood waxa ay leedahay waxaa habboon in magaalada loo aqoonsado in ay tahay mid kamid ah maamullada xubnaha ka ah federaalka ee ka jira dalka. Doodda kale waxa ay leedahay Muqdisho waxa ay sii ahaanaysaa caasimadda dalka waxaana ay hoos imaaneysaa dowladda federaalka ah oo maamulaysa. Labada ra'yiba waxa ay leeyihiin dad taageersan iyo kuwo diiddan oo qeyb ka ah siyaasiyiinta, masuuliyiinta xilka haya, iyo shacabka guud ahaan.

Guddiga Lasocodka baarlamaanka ee Soomaaliya waxa uu soo jeediyay in loo aqoonsado Muqdisho in ay noqoto magaalo-goboleed maamulkeeda u madax bannaan (city state). Guddiga waxa uu hoosta ka xarriiqay in Muqdisho ay sii ahaaneyso caasimadda dalka, maamul u goonni ah yeelan doonto, hay'adaha dowladda federaalka ahna ay u hoggaansami doonaan mabaadii'da iskaashi ee dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada ee uu qeexayo dastuurka. Guddiga Lasocodka waxa uu intaa ku daray in canshuurta iyo sharciyada la xiriira dhulka iyo hantida Dowladda Federaalka ku leedahay goboka Banaadir ay ka wada xaajoon doonaan maamul goboleedka Banadir iyo Dowladda Federaalka.

Aqoonta iyo fahamka Soomaalida ee la xiriirta qaabka uu u shaqeeyo federaalka weli waa ay hoosaysaa, wadar-oggol laga gaaro maqaamka Muqdishana ma u muuqato mid suuragal ah wakhtiga dhaw.[55] Sidaas darteed, cilmibaaris qota dheer in lagu sameeyo qaababka kala duwan ee dastuuriga ah ee loo nidaamiyo caasimadaha dowladaha federaalka ah ayaa loo baahan yahay. Sidoo kale, kahor inta aan go'aan laga gaarin maqaamka iyo mustaqbalka Muqdisho, aad ayay muhiim u tahay in la yeesho dood iyo wadaxaajood u dhexeeya daneeyayaasha oo dhan. Baarlamaanka cusub ee la doortay dhammaadka 2016 iyo dowladduba waa in ay arrinkan ka dhigaan mid kamid ah ahmiyadahooda ugu horreeya.

[54] National leaders Forum Communique, June 3, 2016, http://www.villasomalia.gov.so/war-murtiyeed/

[55] Dood cilmiyeed ka hadleysa hannaanka maamul ee ku habboon Soomaaliya, aqri warbixinta LSE 2005, *A Study of Decentralised Political Structures for Somalia: A Menu of Options*. Waxa aad ka aqrisan kartaa http://tobiashagmann.freeflux.net/files/media/horn/docs/lewis_mayall_1995_decentralised-structures-somalia.pdf

## Gunaanad

Hannaanka dib-u-eegista dastuurka horumar badan ma aanu sameyn afartii sano ee lasoo dhaafay, yoolalkii lagu qeexay Heshiiska Cusub (New Deal) iyo Hiigsiga 2016-na lama xaqiijin. Arrimaha aadka loogu kala aragtida duwanaa weli waa taagan yihiin, wadaxaajood dhab ah ee u dhexeeya hoggaamiyeyaasha siyaasaddana weli lama agaasimin. Dib-u-dhac lagu sameeyay yegleelidda Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, ku guuldarreysiga in la siiyo madax bannaanidii iyo kaabayaashii uu guddiga u baahnaa, hardan siyaasadeed, iyo arrimo kale ayaa ah sababaha ugu waaweyn oo aanu dalka u lahayn dastuur qabya tiran oo ay Soomaali leedahay.

Machadka Heritage waxa uu aaminsan yahay dib-u-eegis dhameystiran iyo go'aanno laga gaaro arrimaha muranka ka jiro in ay muhiim yihiin kahor sanadka 2020-ka. Casharro waa in laga bartaa khaladaadkii horey usoo dhacay, dowladda dhalanaysana waa in ay ka dhigtaa qabya tirka dastuurka ahmiyad muhiim ah. Waa in sidoo kale guddiga baarlamaanka ee dastuurka loo soo xulaa xubno awood iyo aqoon leh, dhaqaalaha ay u baahan yihiinna loo qorsheeyaa.

## Talooyin Tixgelin Mudan

- Hannaanka dastuur sameynta Soomaaliya waxa ay qaadatay wakhti badan. Iskusoo uruurinta aragtiyada, qiyamka iyo rabitaanka muwaadiniinta Soomaaliyeed ma ahayn mid sidii loo baahnaa loo sameeyay. Dowladda dhalanaysa 2017-ka iyo baarlamaanka cusub waa in ay ku dadaalaan sidii ay hannaanka dastuurka uga dhigi lahaayeen mid shacabka laga talo geliyo. Tani waxa ay ka dhigi doontaa dastuurka mid ka yimid una shaqeeya dadka Soomaaliyeed.

- Guddiga Lasocodka Dastuurka ee baarlamaanka waxa uu talooyin u gudbiyey baarlamaanka 10-aad waxa uuna siiyay kala-doorashooyin badan oo ay tahay in Soomaalidu ay kala doorato. Guddiga waxa uu soo jeediyay qaacido 24/7 ah marka ay timaado qeybsiga maamullada ee awoodaha iyo masuuliyadaha. Tani waxa ay ka dhigan tahay, dowladda federaalka waxa ay yeelaneysaa 24 awoodood halka ay maamul gobolladyaduna yeelanayaan ilaa toddobo awoodood. Waxa aan ku baaqeynaa in siyaasiyiinta Soomaalida iyo hoggaanka bulshada rayidka ah si dhab ah uga doodaan heshiisna ka gaaraan talooyinka Guddiga Lasocodka.

- Laanta fulinta dowladda in ay noqoto mid xasiloon, daah furan, lalana xisaabtami karo waa lagama maarmaan. Gole fulin oo qeybsan si hufan ugama shaqeyn Soomaaliya lagasoo bilaabo sanadkii 2000. Soo jeedinta Guddiga Lasocodka ee ah in loo guuro nidaam madaxweyne waxa ay soo afmeereysaa go'aan qaadashada la cuuryaamiyey ee dowladda. Sikastaba arrintu ha noqotee, maaddaama dadka Soomaaliyeed ay kasoo kabanayaan dagaallo sokeeye ee aad u qaraar muddo badanna qaatay, siyaasiyiinta waa in ay fahmaan islamarkaana xal u helaan cabsida laga qabo in awoodihii oo dhan dowladda dhexe lagu uruuriyo.

- Waxa aan sidoo kale ku talineynaa in sida uu qorayo dastuurkii 1960-kii, awoodda uu madaxweynaha u lahaa in uu xilka ka qaadi karo ra'iisul wasaaraha in dib loosoo celiyo. Tani waxa ay ku khasbaysaa ra'iisul wasaaraha in uu heysto kalsoonida madaxweynaha iyo midda baarlamaanka. Waxa aan sidoo kale aamin sannahay in maaddaama madaxweynaha uu yeelanayo awoodo badan in ay shacabka toos usoo doortaan. Si kale haddii aan u dhigno, ra'iisul wasaaraha waa in uu ka hoos shaqeeyaa madaxweynaha, madaxweynahana waa in ay shacabka soo doortaan.

- Gole sharci dejin labo aqal ka kooban waxa loo sameeyaa in uu ka turjumo baahida bulshada. Soomaaliya marka la joogo, muwaadiniinta iyo qabaa'ilka ayaa ah labada danley ee ugu waaweyn ee uu hannaanka siyaasadda ku khasban yahay in uu metelaad siiyo. Sababo siyaasadeed iyo dhaqaale awgood, hal aqal baarlamaan ayaa ah kan ugu habboon Soomaaliya. Sikastaba ha noqotee, siyaasiyiinta waxa ay yegleeleen labo aqal. Waxa ay nala tahay in aqalka hoose uu metelo shacabka. Sanadka 2020, xisbiyo siyaasadeed waa in ay ku tartamaan 275-ta kursi iyada oo dalka oo dhan lagasoo qaadayo in uu yahay hal degmo, doorashadana ay noqoneyso metelaad ku saleysan tiro.

- Aqalka labaad ee la sameeyay waxa uu metelayaa qabaa'ilka ugu waaweyn maamullada gobollada. Nidaam ahaan, labo qaab ayaa lagusoo kala xulay. Metelaad ahaan, sida khibradda Somaliland ay muujineyso, waxa aan taageersannahay aragtida ah in aqalka sare uu metelo beelaha. Waxaa aan ku baaqaynaa in beelaha Benadiri-ga lagu daro hannaanka lagu dhisayo aqalka sare. Waxa aan sidoo kale soo jeedineynaa in mustaqbalka qaabka soo xulidda xubnaha aqalka sare iyo waajibaadka aqalkaas dib loogu laabto.

- Dastuurka ayaa damaanad qaadayaa xuquuqda iyo waajibaadka muwaadinka. Waxa lagama maarmaan ah in dadka Soomaaliyeed ay fahmaan fikradna ku yeeshaan sameynta sharciga ugu sarreeya sharciyada qoran ee dalka lagu maamulo – waa dastuurkee. Siyaasiyiinta Soomaalida waa in ay ogaadaan muhiimadda ay leedahay in la sameeyo dastuur ay fahamsan yihiin, xushmeynayaan una riyaaqsan yihiin shacabka iyo hay'adaha dowladda. Hoggaanka siyaasadda waa in uu ka feejignaadaa isku gaaryeelka hannaanka dib-u-eegista dastuurka.

- In la Soomaaliyeeyo dastuur-sameynta waa in ay ka bilaabataa dowladda Soomaaliya in ay qaadato masuuliyadda maalgelinta dib-u-eegista dastuurka. Taageero dibadda ah waa loo baahan yahay gaar ahaan marka la sameynayo afti dadweyne. Laakiin, Soomaalidu waa in ay qaadataa kaalin lahaansho iyo mid hoggaamineed. Cilmibaaris ayaa muujisay in sida ugu habboon oo taageero dibadda ah loogu isticmaalo hannaan madax bannaan in ay tahay in dadka dalka ay qaataan lahaanshaha hannaanka dastuur sameynta.[56] Taageerada dibadda waa in ay ku timaada qaabkan, waana in aanay ajaanibtu u naqshadeynin Soomaalida, hannaanka dib-u-eegista iyo ansixinta dastuurkooda.

- Bulshada rayidka waa in ay kaalin muhiim ah ka qaadataa ilaalinta danta iyo xuquuqda dastuuriga ah ee shacabka Soomaaliyeed waana in ay kormeeraan ilaa xadka ay hay'adaha dowladdu ku dhaqmaaan dastuurka. Bulshada rayidka waa in ay laba jibbaaraan dadaalka ay ugu jiraan in siyaasaddu aanay qasin hannaanka sameynta dastuurka qaranka.

[56] IEDA, Co*nstitution building after conflict: External support to a sovereign process*, May 2011, http://www.idea.int/publications/constitution-building-after-conflict/upload/CB-after-conflict.pdf

The Heritage Institute

For Policy Studies